



Aagaga War laga Raro iyo Meelaha Qashinka

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. *Tilmaamahaan ku saabsan ilaalinta aagaga qashinka iyo meelaha wax laga raro ayaa naga caawinaysa nadiifinta marinadeena biyaha.*

Aagaga wax Laga Raro

- ☐ Ku raro oo ku deji agabka meelaha loo asteeyay.
- ☐ Ilaali qalabka rarista oo dayactir dilaacyo kasta.

Goobaha qashinka

- ☐ Ka dhig dhammaan aagaga maamulka, kaydka, iyo fogaynta wasaqda meel ka fog marinnada biyaha roobka ama kaydada biyaha.
- ☐ Si sax ah u calaamadee dhammaan kunteenarada agabka dib loo warshadayn karo dibna loo isticmaali karo.
- ☐ Daboolka saar dhammaan kunteenarada agabka dib loo warshadayn karo dibna loo isticmaali karo (qasacyada qashinka, godadka qashinka, qasacyada birta ah, iwm.) marka aan la isticmaalayn si aad uga hortagto waxyaabaha daata iyo wasaq shubista sharci darada ah.
- ☐ Ka daadi qashinka kunteenarada agabka dib loo warshadayn karo dibna loo isticmaali karo ama hala qaado qashinka si joogto ah si looga hortago buux dhaafka.
- ☐ Kormeer dhammaan meelaha qashinka lagu shubo iyo aagaga qashinka asbuuc kasta oo xaaq qashin iyo xash kasta oo aruuray.
- ☐ Ku hay goobaha qashinka iyo qasacyada kale ee qashinka xaalad wanaagsan.
- ☐ Adeegso qaababka nadiifinta qalalan sida xaaqista, tirtista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha daata si aad u nadiifiso qasacyada qashinka.
- ☐ Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha Xeerka Dib u warshadaynta Qashinka ee Ismaamulka San Diego, fadlan wac 877-R1Earth (877-713-2784).

! Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO). *Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.*

Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.



waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayo keliya
dhawr talaabo.

waad ku
mahadsan tahay
inaad doorkaaga ka
qaadatay difaacida
marinadeena biyaha.

